

Waxaa qabaa nooca 1 cudurka sonkorta.

Waa maxay cudurka sonkorta?

Cudurka sonkorta macnaheedu waa heerka aadka u sareeya ee guluukoosta dhiiga. Waxaa jira labba nooc oo ugu muhiimsan.

Nooca 1 cudurka sonkorta waa cudur ay sababto unugyada soo saara insuulinta oo burbura. Insuulin la'aanta waxay keentaa heerka sare ee guluukoosta ee ku jirta dhiiga iyo dareemada jirrada. Marka la qabo nooca 1 cudurka sonkorta, insuulin waa lagu shubaa jidhka iyadoo la isticmaalayo mudditaanka insuulinta ama bamka insuulinta. Haddii aanu jirku helin insuulin, waxaa kugu dhici kara cudurka ketoacidosis, taas oo ah mid darran oo suuragal ahaan nolosha halis gelinaysa.

Nooca 2 cudurka sonkorta inta badan waxa uu dhacaa goor dambe oo nolosha ah, iyadoo aayar-ayyar insuuliintu u sii xumaata. Cudurka waxaa lagu daweyaa kiniin ama mudditaan.

Waa maxay insuulintu?

Insuulintu waa hormoon kaas oo maamula guluukoosta dhiiga. Insuulintu waxay suuragelisaa guluukoosta dhiiga in loo nuugu unugyada jidhka oo loo isticmaalo tamar. Insuulintu halkaas waxay ku yaraysaa guluukoosta dhiiga. Haddii aanu jidhku helin insuulin ku filan, guluukoosta dhiiga way korodhaa oo waxaad dareenta bukaan.

Sababtee ayaan u yeelanayaa nooca 1 cudurka sonkorta?

Cidna ma taqaano hubaal ahaan waxa sababa nooca 1 cudurka sonkorta ama sababata unugyada soo saara insuuliinta ay u burburaan. Maaha khaladkaaga inaad qabto nooca 1 cudurka sonkorta oo ma khusayso waxa aad cuntay ama samaysay ka hor inta aanad qaadin cudurka.

Sababtee ayay baadhitaanka guluukoosta dhiigu muhiim u tahay?

Heerarka guluukoosta dhiiga ee aadka u sareeya ee muddo badan waxay u xuntahay caafimaadkaaga iyo korodhka khatarta waxyeelada ee halbowlayaasha dhiiga, indhaha, kelyaha iyo neefaha. Xiliga dheer, khatarta waxyaabaha sida wadna xanuunka, faaliga, nabarada cagta iyo kelida oo shaqayn wayda way kordhaan.



Ujeedaadu waa in lagu hayo guluukoosta dhiiga heer wanaagsan oo la iska ilaaliyo samaynta wayn muddada lagu dhex jiro maalinta.

Sidee nooca 1 cudurka sonkorta lagu aqoonsadaa?

Nooca 1 cudurka sonkorta waxaa lagu aqoonsadaa iyadoo la qiyaasay heerarka guluukoosta.

Waa maxay nooca 1 cudurka sonkorta?

Cudurka sonkorta kaas oo heerarkaaga guluukoosta dhiiga la kordhiyay.

Nooca 1 cudurka sonkorta, unugyada soo saara insuulinta ayaa la burburiyay. Insuulin la'aanta waxay keentaa heerka sare ee guluukoosta ee ku jirta dhiiga iyo dareemada jirrada.

Sababtee ayay baaritaanka guluukoosta dhiigu muhiim u tahay?

Waa u caadi heerarka guluukoosta dhiiga inay kordhiyaan cunista ka dib laakiin guluukoosta dhiiga aadka u sareeya ee muddo badan waxay waxyeelayn karaan halbowlayaasha dhiiga, indhaha, kelyaha iyo neefaha.

Hubinta heerkaaga guluukoosta dhiiga waxay yaraysaa khatarta waxyeelada xubnahana.

Haddii aad u baahantahay macluumaad dheeraad ah, waxaad waydiin kartaa kalkaalisada ama dhakhtarkaga. Sidoo kale waxaa lagugu soo dhowaynayaa inaad la xiriiro Macluumaadka Caafimaadka xaga Lilly.

Telefoonka: 08-737 8800
limayl: scan_medinfo@lilly.com